

## Imaanshaha Joogtada ah waa mid Muhiim u ah Arday Kasta

Ilmahaagu wuxuu joogitaan gaar ah ku biiriyaa bulshada waxbarashada, iyada oo safarka waxbarashaduna yahay mid hodan ah oo qoto dheer marka asxaabta isku fasalka ah wax wada bartan. Ardayda leh imaanshaha joogtada ee dugsiga waxay u badan tahay in ay shaqo wanaagsan qabtaan dugsiga iyo wixii ka dambeeya. Waxaanu faraxsan yahay in uu iskaashi kaala yeelano taageerida waxbarashada ardaygaaga iyo imaanshihiisa dugsiga ee sanadkan!

Ma ogayd in imaanshaha joogtada ee dugsiga ay door weyn ka ciyaarto guusha ilmahaaga? Waa mid run ah! Halkan waxaa ku qoran sababta imaanshaha dugsigu uu si aad ah muhiim ugu yahay:

- 1. Imaanshaha iyo Guusha:** Imaanshaha wanaagsan wuxuu si dhow ugu xiran yahay shaqo wanaagsan oo la qabto dugsiga. Marka ay ardaygu dugsiga ku jiraan maalin kasta, waxay yeeshaan fursado dheeraad ah oo ay wax ku bartaan kuna korraan. Dhinaca kale, haddii ay ardaydu inta badan maqan yihiin, waxaa ku adag in ay jid toosan ku taagnaadaan.

  - A. Dugsiga hoose:** Ardayda sida joogtada u timaada dugsiga ee dhigata fasallada K-3 ayay **u badan tahay in ay akhriyaan meel gaarsiisan heerka fasal.**
  - B. Dugsiga dhexe:** Marka la gaaro fasalka 6-aad, maqnaanshuhu **waa mid ka mid ah saddex calaamadood** oo ah in ardaygu ka hadho dugsiga sare.
  - C. Dugsiga Sare:** Marka la gaaro fasalka 9-aad, **imaanshaha dugsigu waa saadaaliye wanaagsan ee heerarka qalin-qabinta** marka loo eego buundooyinka imtixaanka fasalka 8-aad.
- 2. AbMaqnaanshuhu Wuu Is biirsadaa:** Maalin kasta dugsigu wuxuu ku xisaabtamaa safarka ilmahaaga ee dhanka korritaanka iyo wax ogaanshaha. Maqnaansho joogto ah waxaa lagu qeexaa in uu yahay 18 maalmood sanadkii ama kaliya 2 maalmood bishii – xataa haddii maqnaanshahaasi cudurdaar loo yeelay! In intani oo jeer laga maqnaado dugsi ka tirsan dugsiga barbaarinta carruurta ‘kindergarten’ wuxuu hoos u dhigi karaa in guul laga gaaro fasalka 1-aad iyada oo, ardayda qaarkoodna tahay, ilaa fasalka 5-aad.
- 3. Kalsooni Dhisida:** In goob-joog la ahaado marka macluumaadka la bixiyo waa mid muhiim ah. Marka uu ilmahaagu maqnaado hal maalin ama hal cashar, taasi waxay ka dhigan tahay in marka uu ku soo noqdo dugsiga, in ay dhici karto in uu ka maqnaaday wax muhiim u ah fahamkiisa waxbarashada shanta maalmood ee xigta. Dhigashada joogtada ah ee dugsigu waxay ardayda ka caawisaa in ay jid toosan ku taagnaadaan oo kalsooni ku dareemaan horumarkooda. Marka ay ardaydu goobta joogaan ee ay si firfircoon ugu lug yeeshaan safarkooda waxbarasho, tani waxay kor u qaadaa kalsoonidooda iyo rabitaankooda in ay ku soo noqdaan dugsiga maalin kasta.
- 4. Wax ka qabashada Caqabadaha:** Waa muhiim in la ogaado waxa ilmahaaga ka dhigaya in uu ka fogaado dugsiga oo wax looga qabto iyada sida ugu dhakhsaha badan. Maskaxda ku hay in cabashooyinka la xiriira calool xanuunka ama madax xanuunku ay noqon karaan calaamad muujinaysa walaac jira oo aanay ahayn sabab lagu sii joogo guriga. Maqnaanshaha soo noqnoqda wuxuu noqon karaa calaamad ah in arday uu luminayo xiisaha uu u qabo dugsiga, ay ku adag tahay shaqada dugsigu, oo la tacaalayo xoog isku sheegasho ama la kulmayo dhibaato kale. Haddii ay tahay arrimaha dhanka gaadiidka ah, dhibaatooyin caafimaad, ama wax kale, la xiriir dugsiga si aad u taageerto oo oo u hesho xal isbeddel u keeni kara imaanshaha dugsiga iyo guusha ilmahaaga.

Fadlan la xiriir \_\_\_\_\_ haddii uu ardaygaagu uu baahan yahay taageero laga siiyo imaanshaha dugsiga sanadkan.

